



Heshiiska Isticmaalaha Aalada Digital Dreamers SY24-25

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb ayaa siinayo Chromebook ardayda ku jirto Pre-K - fasalada 12^{aad} oo isticmaalida inta lagu jiro sannadka waxbarashada (SY 2024-2025). Chromebooks waxay ahaanayaan hantida DCSD (Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb) oo waa in la soo celiyaa markii ka laabashada ka imaaneyso Degmada iyo/ama dhammaadka sannadka ee nidaamka aruurinta.

Waaladiinta iyo ardayda waxaa looga baahanyahay inay aqriyaan, saxiixaan oo raacaan jaheynada oo gudaha warqadaan, sidoo kale sida dhammaan dugsiga, fasalka, iyo xeerarka Dugsiga Degmada iyo nidaamyada la xiriira isticmaalka dabecada iyo cilmiga farsamada.

Qofka Xiriirka: Haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo fadlan la xiriir maamulka dugsigaaga.

Heshiiska Chromebook

Helitaanka Qalabka

[Waaladiinta iyo ardayda waa inay saxiixaan oo soo celiyaan heshiiskan ka hor inta aan la ansixin qalabka.](#)

Soo celinta Qalabka

Qalabyada waxaa lagu soo celinayaa dugsiga dhammaadka sannad dugsiiyeedka. Isticmaalka qalabyada ee ay bixiyeen DCSD laguma wareejin karo qof walba iyo la joojiyaa markii ardayga uusan markale ka diiwaangashaneyn dugsiga ansixinayo.

Ardayda wareejisaa, ka laabataa, laga ceyriyaa, ama la joojiyaa diiwaangelinta dugsiga oo sabab walba waa inay soo celiyaan qalabkooda taariiqda ka bixintaanka/joojinta.

Arday walba ee ku guuldareysto inuu ku soo celiyo qalabka ayaa quseyneyso inuu bixiyo illaa qarashaadka badelida buuxdo iyo isbeerada kale oo illaa \$457.65.

Waxyeelada iyo Lumitaanka

Haddii qalab uu halaabo, lumo, ama la xado inta lagu jiro waqtiga loo ansixiyay ardayga, haddii ay tahay ku talagal ama sabab la xiriirto dayacaad, ardayga iyo waalidka/masuulka ardayga ayaa masuul ka noqonayo bixinta ganaaxyada lagu tilmaamay warqadaan.

Dayacaada

Maamulka degmada ayaa go'aansanayo qorshaha tallaabada oo ay ku jiraan badelid buuxdo oo Chromebook illaa \$457.65, haddii qalabka uu waxyeelamay dhoor jeer isla sannadka dugsiga.

Masuulnimada Isticmaalka Qalabka

Dhammaan isticmaalayaasha qalabyada Degmada ansixisay waa inay raacaan filashooyinka lagu tilmaamay Xeerka Degmada iyo Tilmaamaha Howlgalka *IFBGA: Masuulnimada isticmaalka Shabakada Ganacsiga, JD: Edbinta Ardayga/Xeerka Anshaxa Ardayga, iyo JS: Ganaaxyada Ardayga, Qidmooyinka, iyo Dalacaadyada*. Haddii aad ku guuldareysato inaad raacdid filashooyinkan waxay u hogaamineysaa ardayga edbinta u qalmo. Dhammaan xeerarka Degmada ayaa laga heli karaa www.dekalbschoolsga.org.



Iyada oo ka maqantahay dhulalka dugsiga waaladiinta/masuulada ayaa masuul ka ah kaliya kormeerida isticmaalka ardayga ee qalabka. Ardayga laga yaabo inuusan soo bandhigin dabecad aan ku habooneyn, ama helitaanka qalabyo la mamnuucay oo ay la jirto qalabka, xili walba, goob walba. Ardayga waxaa quseynayo edbin iyo/ama tallaabo sharci haddii ay u isticmaalaan qalabka howlo aan ku habooneyn, haddii ay tahay dhulalka dugsiga ama ka baxsan.

Arimaha gaarka ah

Qalabyada degmada ansixisay waa hantida DCSD. Sida, wax walba oo lagu sameeyay qalabka ma ahan gaar. Tani waxay la micna tahay in shaqaalaha DCSD laga yaabo, in si walba, loogala wareego oo loo baaro tusmooyinka qalab walboo koronta ah oo Degmada ansixisay. Dhacdada qasaaraha ama xatooyada, Chromebook dib ayaa loo daarayaa.

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb way aqoonsantahay dhammaan qeybaha Xeerka Illaalada Asturnaanta Onleenka Carruurta (**COPPA**), Xeerka Illaalada Intarneetka Carruurta (**CIPA**), iyo Xeerka Xaquuqaha Waxbartashada Qoyska iyo Astrunaanta (**FERPA**).

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb ma kormeeraan shabakadaha guriga ardayga, aaladaha, ama xiriirada intarneetka. Degmada ma kormeerto isticmaalka qalabyada Degmada ansixisay. Intaas waxaa dheer, DCSD ayaa raadraaco goobta aaladaha Degmada soo saarto haddii ay dhacdo qasaaro ama xatooyada aalada.

Codsiyada

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb wuxuu baaray barnaamijyada ugu muhiimsan taas oo horay loo galiyay qalab walba. Inta lagu jiro sannadka, barnaamijyo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa si loo taageero waxbarashada. Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb ayaa ka ahaanayo masuulka iibsashada iyo gelinta codsiyada.

Ma jiro qof aan ka aheyn sarkaalka dugsiga loo ogolaaday ayaa ku dari karo ama ka tiri karo barnaamijyada ee qalabka Degmada ansixiyay. “Xabsi jabinta” iyo jabsiga aaladaha lama ogola.

Ganaaxyada Waxyeelada Aalada, Qasaaraha, ama Xatooyada

Haddii sabab walba qalabka iyo isbeerada ay lumaan ama la xado inta lagu jiro waqtiga loo sameeyay ardayga, haddii si ula kac ah ama sabab la xiriirto dayacaad, ardayga iyo waalidka/masuulka ayaa masuul ka ah qidmooyinka xiggo:

Badelida Chromebook/Isbeerka ee Aaladaha Chromebook

Sameynta dhaafsan Lumista/Xatooyada/Waxyeelida	<ul style="list-style-type: none"> • \$457.65
Waxyeleysan- La sameyn karo	<ul style="list-style-type: none"> • Aaladaha dhaawacan waxaa qiimeynayo kooxda DCSD si loo go'aamiyo haddii hagaajin ay dooq tahay. Haddii waxyeelada dhaafsan tahay sameynta qidmada badelid buuxdo ayaa loo baahanayaa. Fiiri kor.
Isbeerada Kaliya	<ul style="list-style-type: none"> • Acer Spin 511, 311 & 712 Power Adapter \$35.70 • Kafarka Chromebook Gum Drop \$15.42

**Qarashka badelka buuxo ee qalabyada waxaa ku jiro qalabka, dhammaan qalabyada, shatiyada softaweerka iyo dajinta.*



Xatooyada:

Haddii qalabka la xado inta lagu jiro waqtiga loo ansixiyay ardayga iyo ardayga, waalidka/masuulka ayaa ka masuul noqonayo:

- Ogeysiinta Maamulka Dugsiga
- Buuxita wargelinta booliska
- Bixinta qiymada badelid buuxdo

Haddii aad ku Guuldareysatid Soo celinta Qalabka ama Isbeerka xiliga Wareejinta/Ka bixitaanka Dugsiga:

Ardayga u wareego ama ka laabto oo ku guuldareysto inuu soo celiyo qalabka ama isbeero walbo waxay masuuliyad ka noqonayaan lacag bixinta oo illaa \$457.65 (badelaad buuxdo) oo Chromebook iyo kafarka.

OGOLAANSHAHA IYO SIIDEYTNTA WAALIDKA

Saxiixida heshiiskan, waxaad tilmaameysaa inaad aqrisay oo aad fahamtay jaheynada warqadaan ku jirto, oo aad ogolaatay ansixinta qalab ardaygaaga. Waad fahamsantahay in Chromebooks ay ahaato hantida DCSD oo waa in la soo celiyaa xiliga ka laabashada Degmada iyo/ama dhammaadka nidaamka aruurinta sannadka. Waad fahamsantahay in ardaygaaga uu masuul ka yahay waxyeelada, lumitaanka ama xatooyada qalabka iyo isbeerada iyada oo isaga/iyada daryeelkooda ku jiraan oo ogolaatay ganaaxyada lagu tilmaamay warqadaan

Waad fahamsantahay oo aad ogolaatay in, inta aad ka maqantahay dhulalka dugsiga, adiga kaliya ayaa masuul ka ah kormeerida isticmaalka ardaygaaga ee qalabyada iyo tasmada laga geli karo dhinaca shabakad walboo wayarles ah. Waad fahamsantahay in ardayda lagu soo rogayo tallaabo edbin ah haddii ay u isticmaalaan qalabka howlo aan ku habooneyn ama la mamnuucay, haddii ay tahay dhulalka dugsiga ama ka baxsan.

Adiga iyo ardaygaaga waxaa ogolaateen in Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb uusan masuul ka aheyn waxyeelada ulakaca ah ama aan ula kaca aheyn sabab la xiriirto si xun u isticmaalka, ku xadgudubka, qarinta, jabsiga, ama ciladeynta qalabka. Isticmaalaha arday walba ee aan u hogaansamin Heshiiska Isticmaalka ee Intarneetka laga ogolaan karo Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb, waxay quseyneysaa qiyaasaha edbinta ee ay ku rogeen maamulka dugsiga deegaanka. Xadgudubyada ardayga waxay sidoo kale sababi kartaa tallaabada edbin ku haboon intaas waxaa dheer hakinta ama ka joojinta mudnaanada gelida.

Magaca Waalidka/Masuulka

(Fadlan Qor): _____

Saxiixa Waalidka/Masuulka: _____ **Taariiqda:** _____

HESHIISKA IYO SAXIIXA ARDAYGA

1. Waan daryeelayaa qalabka dugsigeyga ii ansixiyay.
 - a. Xargaha iyo fiilooyinka waa in si taxadar ah loo geliyaa qalabka si looga illaaliyo waxyeelid.
 - b. Aaladaha waa inaan marnaba looga tagin sanduuq furan, gaari, ama aag walboo aan la kormeerin.
 - c. Ku soo wargeliyo arima walboo softaweer/haadhweerka dhinaca Dhacdada IQ- Bogga Caawinta Ardayga.
 - d. Ku haayo qalabka jawi si wanaagsan u illaalsan, heerkululka xakameysanyahay markii aan la isticmaaleyn.
2. Ma amaahinayo qalabka dugsigeyga ansixiyay shaqsiyaad kale.
3. Waan ka fogeynayaa cunto iyo cabitaano qalabkeyga.
4. Ma kala furayo, ma jabinayo ama ma jabsanayo qeyb qalabka dugsigeyga ansixiyay ama qalab walba.
5. **ISKUMA** dayayo inaan ku sameeyo hagaajin walba aaladeyda.
6. Waxaan ku illaalinayaa qalabka dugsiga ansixiyay iyada oo lagu qaadayo boorsada la isiiyay.
7. Waxaan ku isticmaalayaa qalabka dugsigeyga ansixiyay qaababka ku haboon oo buuxiyo filashooyinka dugsiga- ama aan dugsiga joogo, guriga, ama meel walboo kale. Haddii aan u isticmaalo qalabkeyga qaab aan ku habooneyn, waxaa i quseynayo tallaabooyinka edbinta oo dugsigeyga.
8. **MA** saarayo qurxino (sida istiikaro, calaamado, iwm.) ee aalada ay dugsiga soo saarto. Ma badelayo istiikarka lambarka taxanaha oo qalabka walboo dugsiga ansixiyay.
9. Waan fahamsannahay in aalada dugsigeyga soo saaro waxay quseeyaan baaris iyo la xisaabtan oo xili walba iyadoon ogeysiin jirin. **MA JIRAAN wax aan ku sameeyo ama ee qalabka oo gaar ah.**
10. Lama wadaagayo furayaheyga (furayaasheyda) qof walba aan ka aheyn macalinka ama qofka weyn ee dugsiga ama waalidka/masuulka.
11. Waan fahamsannahay in Chromebooks ahaanayo hantida DCSD oo waa in la soo celiyaa xiliga ka laabashada Degmada iyo/ama dhammaadka sannad dugsiiyeedka inta lagu jiro nidaamka aruurinta.
12. Waan fahamsannahay in haddii aan waxyeelo ama lumiyo qalabkeyga, ama la xado, waxaa i quseynayo qarashka badelida qaabka.

Waan ogolaaday sharciyada lagu dajiyay Heshiiska Isticmaalaha Qalabka iyo Heshiiska Ardayga.

Magaca Ardayga (Fadlan Qor): _____

Saxiixa Ardayga: _____ **Taariiqda:** _____